# LIISKA EREYADA
# DIIWAANGALINTA MACNAHOODA

**Aaga Iskuulka Kuu Dhow**

Aaga Iskuulka udhow gurigaada (iskuulka hoose, K-8, dhaxe ama sare) waxaa lagu go'aamiyaa iyada oo ku saleeysan cinwaanka Waalidka/Masuulka Sharciga ah uu ku noolyahay ee xudduudaha Dagmada, cinwaanka qofka ku magacaaban Ilaaliyaha Waxbarashada hadii Ardaygu uu helo daganaansho.Aaga iskuulka kuu dhow waxa laga xaqiijini karaa adiga oo soowaco xafiiska Dhaxe ee Diiwaangelinta (920)448-2001.

**wada- Noolaanshada**

Wada-dagananshada waxa loola jeedaa xaalada marka qoys guri ku aasaaso ama ladago guri qoys kale ama shaqsi kale uu daganyahay ("qofka guriga dagan"). Tusaalayaasha ugu badan ee wada- deganaanshaha noqon karo waxaa kamid ah:a)labo qoys oo guri kuwada nool;b)Arday da'diisu weeyntahay oo la nool qof kale; c)Xaaska marka hal qof oo kaliya uu cadeyn karo cinwaanka uu ku nool yahay; ama d) cunug ama waalid la nool ayeeyo/awoowe.Xaaladani marka ay dhacdo waa in la buuxiyaa foomka Wada- Daganaanshada si loo cadeeyo cinwaanka la dagan yahay.

**Ilaaliyaha Waxbarashada**

Waa Ogolaansho uu bixiyo waalidka/Masuulka sharciga ah asaga oo u ogalaanaayo shaqsi weeyn inuu ka faalo qaado Ardayga,ardaygana uu ladaganyahay qofka masuuliyadiisa qaadaayo,Waalidkana/Masuulka sharciga ah uu daganyahay meel kabaxsan xuduudaha Dagmada Green Bay Iskuuladeeda *ama Waalidka/Massulka Sharciga ah ay lasoodiristo xaalad adag sida ay qeexday Dagmada oo kamid ah,xarig,daryeel caafimaad muda dheer,naafanimo,ama fasax milatari taasoo ka hor joogsato in Waalidka/Masuulka sharciga ah uu daryelo Ardayga.* Masuulka Waxbarasha qofka ah ayaa masuul ka ah kamaqnaanshada iskuulka,edbinta,bixinta lacagta feega,adeegyada caafimaadka,tallalada,diiwaangelinta,badalka iskuulada dagmada dhaxdeeda,karaka natiijada, ama adeegyada waxbarashada gaarka ah ee uu leeyahay Ardayga.Ogolaanshada Ilaaliyaha Waxbarashada,Waalidka/Masuulka sharciga ah waa inuu buuxiyaa Foomka Codsiga Daganaanshada iyo Masuulka Waxbarashada uuna keeno cadeeynda'da Ardayga. Qofka loodoortay inuu noqdo Ilaaliyaha Wacbarashada waa inuu aqbalaa masuuliyada,soona buuxiyo foomka diiwaangelinta,cadeeyana halka uu daganyahay.

**Rekoorka Tallaalada**

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan talaalka, fadlan tixraac Iskuulada Green Bay baga Tallaalka Dagmada.

**Kuwareegida Iskuuk kale oo Dagmada kuyaalo**

Kuwareegida iskuul kale oo dagmada kuyaalo waxaa loola jeedaa Ardayga oo kabadasho iskuulka u dhow meesha uu daganyahay oo u badasho Iskuul kale oo kuyaalo Dagamada Green Bay. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka codsiga Kuwareegida Iskuul kale -Degmada waxaa laga heli karaa Sharciga 433 Gudiga Waxbarashada Dagmada iyo Qaanuunka 433.

**Diiwaangelin Furan**

Diiwaangelin furan waxaa loola jeedaa marka Waalidka/Masuulka sharciga ah u codsan karo caruurtiisa iskuul kabaxsan dagmada uu ku noolyahay.Macluumaad dheeraad ah uu kusaabsan diiwaangelinta furan waxaa laga heli karaa bagga waaxda waxbarashada ee Wisconsin ama riix halkaan.

**caddeyn da'da**

Iskuulada Dagmada Green Bay waxa ay u baahanyihiin caddeyn da'da marka diiwaangelinta.Dikumintiyada la aqbali karo si loo hubiyo dalashada waxaa kamid ah nuqul warqada dhalashada,dekuminti sharci ah,baasaboor,ama dikuminti dal ku gal ah.

**Caddeyn Waalidka/Masuulka sharciga ah**

Iskuulada Dagmada Green Bay waxa ay u bahanyihiin caddeyn Waalidka/Masuulka sharciga ah arday walbo.Dikumintiyada la aqbali karo si loo xaqiijiyo Waalidka/Masullka sharciga ah waxaa kamid ah nuqulka warqada dhalashada ilmaha,Warqada Masuuliyada,ama dikuminti kalo oo maxkamadeed oo tusineeyso masuulka sharciga ah ee cunuga.

**Caddeynta Degenaanshaha**

Deegaanka Waalidka ama Masuulka sharciga ah waa in laxaqiijiyaa xiliga diiwaangelinta Ardayga ee Iskuulada Dagmada Green Bay iyo nawaaxigeeda.Dikumintiyada la aqbali karo si loo xaqiijiyo daganaashada waxaa kamid ah biilka kuugu dambeyaya oo ku qoran magaca iyo cinwaanka,nuqilka liiska guriga,kirida ama nuqul warqada iibsiga guryaha.Warqadaha biilka waxa ay diyaar ku yihiin onlaynka shaqaalaha Iskuulada Dagmada Green Bay ayaa caawini karo Waalidka/Masuulka sharciga ah si aad u hesho macluumaad kaas.

**Xuquuqda Rekorka**

Shaqsi sadaxaad(sida adeerka/eedo ,awoowe/ayeeyo ama qofka lawaco kolka ay jirto xaalad dag ah) oo haysto Xaquuqda Rekorka ayaa awoodo inuu la xiriiro Iskuulada/shaqaalaha Dagmada ee Ardayga iyo in uu heli karo Rekorka waxbarashada iyada oo qoraal ama afka ah.Rekoorka Ardayga oo lasiiyo qof sadaxaad waxaa kamid ah horumarka ,dhaqanka iyo rekorka caafimaadka .Xaquuqda Rekorka kuma jiro xaquuqda go'aanka waxbarasho mana siineeyso awood qofka Ilaaliyaha Waxbarashada.Waalidka ilmaha xanaaneeyo waa in ay buuxiyaan Fomka Ogolaanshaha waalidka-foomka Xanaanada.

**Xaquuqda Gaaritaanka Go'aan Waxbarasho**

Shaqsi sadaxaad(sida adeer/eedo,awoowe/ayeeyo ama qofka lawaco marka xaalad dag ah timaato) oo haysta Xaquuqda Gaaritaanka Go'aan Waxbarasho ayaa awooda in uu gaaro go'aamada aasaasiga ah ee waxabarashada.Go'aamada waxbarasho waxaa kamid ah kaqeeb galka shirarka,ogolaanshada kaqeebqaadashada ciyaaraha iskuulka,la xariirka macalinka/ama iskuulka iyo koorsiooyinka waxbarasho.Xaquuqda Gaaritaanka Go;aan Waxbarasho masiineeyso masuuliyada sida Illaaliyaha. Waxbarasho(micnaha kore fiiri) mana badaleeyso xaquuqda Waalidka/Massulka Sharciga ah uu kuleeyahay Ardayga.Waalidka/Masuulka Sharciga ah ayaa masuul ka ah waxyaalaha laxariiro iskuulka.

**Dhalanyaro aan lala socon**

Dhalanyaro aan lala soconin waa Ardayga uu san joogin Walidka/Masuulka sharciga ah.Waxaa kamid ah ilmo yar oo guriga laga soo ceeriyay,ama waalidka/Masuulka Sharciga ah ay dayaceen,ama waa soo golooti aa nan wehelinin Waalidka/Masuulka Sharciga ah,ama waxa uu sugayaa meesha caruurta lagu xanaaneeyo.Xaaladahani oo dhan,Iskuulada Dagmada Green Bay ee dadweeynaha waxa eey heleeysaa oona hayneeysaa faylka aay kuqoran yihiin magacyada iyo nambarada xaalada dag daga ee dhalanyada aan lala soconin.